

## Qofkee ayaa qaadi kara tiibayda?

Wadan kasta waxaa ku nool dad qaba tiibay. Tiibaydu waxay ku badan tahay qaarada Eeshiya, Afrika, Koonfurta Ameerika iyo Yurubta bari. Markaa inta badan waxaa dhacda in dadka dhulkaa ka yimaadaa ay xanuunkan qaadaan una bukoodaan.

Qof kastoo ka yimi wadan tiibaydu ku badan tahay, waa in tiibay laga badhaa wzyar kadib markuu Noorway yimaado. Baadhitaanka waxa fulinaya shaqaalaha caafimaadka ee degmada qofku uu degan yahay.

## Waa maxay sababta dad badan uga baqaan tiibayda?

Sababaha caadiga ah ee dad badan uga baqaan tiibayda, waa iyagoo aqoon fiican u lahayn cudurka. Dadka aan aqoon fiican u lahayni, waxay wataan aragtiyo iyo tusaale gaar ah. Dad badan ayaa ka cabsanaya in ay qaadaan, sabatoo ah iyagoon ogeyn in bukaanka tiibayda ee hospitaalka ka soo baxaa aanay dadka qaadiin arin.

Qaar badan oo ka mid ah bukaanka tiibayda ayaa taas daraadeed baqa oo qariya cudurkooda. Waxay ka baqayaan in hadii dadku ogaadaan in ay tiibay qabaan laga fogaanayo, loo diidayomin lala cunteeyo, iyo waxyaale la mid ah. Waxa kale oo iyana cabsan kara dadka qaba calaamadaha tiibayda, waxaanay sababi kartaa in ay dhakhtarka u tegin.

Marka dadku aqoon u leeyihiin tiibayda oo ay ogyihiin in dadka daaweyn fiican ka qaata tiibaydu aanay dadka kale qaadiin karin, waxay dareemayaan amaan. Waxaanay markaas awoodaan in ay dadka tiibayda qaba siiyaan daryeel iyo taageero.

Ma rabtaa macluumaad intan ka badan oo tiibayda ku saabsan? Waxaad geli kartaa barta internetka ee Folkehelseinstituttet ([www.fhi.no](http://www.fhi.no)) ama LHL ([www.lhl.no](http://www.lhl.no)).

Barta internetka ee ah [www.lhl.no/no/Om-LHL/Stopp-tuberkulosen/Helsekommunikasjon](http://www.lhl.no/no/Om-LHL/Stopp-tuberkulosen/Helsekommunikasjon) waxad ka helaysaa buugan oo warbixin dheeraad ah ku taal oo dhowr af ah.



Oslo kommune  
Utdanningsetaten  
Oslo Voksenoppl ring



Postboks 4375 Nydalen, 0402 Oslo  
Cinwaanka xarunta: Sandakerveien 99, Oslo  
Telefoon: 22 79 93 00  
E-mail: [post@lhl.no](mailto:post@lhl.no)  
Internett-ka: [www.lhl.no](http://www.lhl.no)

## Waad ka bogsanaysaa tiibayda



SOMALI

## Waa maxay tiibaydu?

Tiibaydu (qaaxadu) waa xanuun ka dhasha bakteeriya. Bakteeriyadu waa abuur yaryar, oo aan la arki karin oo meelkasta jooga, dabeeciga iyo jidhka dadkaba. Bakteeriyada inteeda badani maaha wax khatar ah, weliba waxay leedahay faa'iido. Laakiin qaar bakteriyada ka mid ah ayaa gaysan kara dhaawac sababinakara xanuunada loo yaqaan infakshanka. Bakteeriyada keeni karta Tiibayda, waxay ka mid tahay kuwaa. Haddii bakteeriyadu hoy ka samaysato kuna taranto meel ama goob jidhka ka mid ah isla markaana jidhku iska difaacikariwaayo, markaa waxaa kugu dhici kara xanuunka tiibayda.

Sida caadiga ah tiibaydu waxay ku dhacdaa sambabada, laakiin way ku dhici kartaa qaybo kale oo jidhka k amida sida (tusaale ahaan lafaha, mergiga iyo maskaxda).


**Tiibaydu waa cudur la dawayn karo, lagana bogsado.  
Dawooyinka tiibaydu waa u bilaash qof kastoo Noorway jooga.**

## Sidee ama habkee loo daaweeyaa tiibayda?

Tiibayda waxaa lagu daaweeyaa daawo, sida caadiga ah kiniin, waana bilaash Noorway. Bukaanka badankoodu waa in ay qaataan daawada maalin kasta muddo lix bilood ah, laakiin marmarka qaar muddadu intaa way ka dheeraan kartaa. Qof ka socda hay'adaha caafimaadka ayaa kuu keenaya daawada maalin kasta. Daawaynta kaddib waad ka bogsanaysaa tiibayda.

## Sidee baa lagu qaadaa tiibayda?

Sida aad halkan ku aragtid bakteriyada tiibaydu iyada oo dhibco yaryar ah ayay ku faaftaa (fiddaa) hawada. Dhibcahan yaryari waxay kasoo baxaan afka ama sanko qof qaba tiibay marka uu hadlo, qufaco ama hindhiso, isla markaana waxay galaan hawada. Markaa bakteriyada tiibaydu waxay ku jirtaa dhibcahaa qaar ka mid ah. Kadib marka hawadaa ama naqaska uu qof qaato, waxaa suurto gal ah in dhibco bakteeriya ahi ay la socdaan una sii gudbaan sambabada qofkaas.



Bakteriyada tiibayda si fudud looma qaado, markaa waxa ay u badan tahay in aad ka qaadid qof kula degan. Tiibayda sambabada iyo nooc aan badnayn oo ah tiibayda hunguriga cad oo keliya ayaa dadku kala qaadi karaan. Kama qaadi kartid tiibayda qof daawayn fiican ka qaatay 2 ilaa 3 usbuuc.


## Dadka qaada, in yar baa xanuusata

**Qasab maaha in dadka qaba tiibaydu ay xanuunsadaan.** Qiyaas ahaan 1/3 dadka dunida ku dhaqan jidhkooda way ku jirtaa bakteriyada tiibaydu, laakiin tiro yar oo kooban oo kuwan ka mid ah ayaa bukoota. Sababta keenta in qaar ka mid ah dadka qaba xanuunkan ay u xanuunsadaan waa iyaga oo uu liito ama hooseeyaan difaacayaasha jidhkoodu (tusaale ahaan xanuun aw gii, degenaansho la'aan, isbedel cimilo, nafaqa daro, isbeddel cunto ama sababo kale aw geed). Sanado badan ayay qaadan kartaa marka uu qofku qaado xanuunkan ilaa inta uu u bukoonayo.

Hadii aad qaaday bakteriyada, laakiin aanad bukoon, waxa si kastaba imaan karta in dhakhtarku kugula taliyo inaad dawada tiibayda qaadatid in muddo ah (saddex ilaa lix bilodd). Waxa looga jeedaa in laga hortago inaad mustaqbalka xanuusatid. Daawayntan waxa la yidhaah daawaynta tiibayda ee ka hortaga ah. Daawayntani qasab maaha. **Maadaama kuwa daawaynta ka hortaga ah qaadanayaa ay caafimaad qabaan, cid kale ma qaadiin karaan.**

## Sidaad ku ogaan kartaa in aad qabtid tiibay?

Qofka qufaca laba ilaa saddex usbuuc ama ka badani waxaa suurto gal ah in uu qabo tiibay ah nooca sambabada. Calaamadaha u caadiga ah tiibayda sambabada waa:



Qufac

- Qufac wata xab badan, marmarna dhiig
- Laab xanuun

Calaamadaha kale ee lagu garto dhamaan noocyada kala duwan ee tiibaydu waa:




Abateed la aan Miisanka qofka oo hoos u dhaca




Qofka oo dareema tabar dari iyo daal



Qandho muddo dheer ah



Dhidid habeenkii



Barar ama soo buurnid qoorta (luqunta), gacanta hoosteeda ama qanjidhka

Calaamadahani sidoo kale waa calaamado lagu garto xanuuno kale oo badan, markaa si loo hubsado waxa aad qabtaa in uu yahay tiibay waa in lagu baadhaa habab badan. Qofka isku arka hal ama dhowr calaamadahan ka mid ah, waxaa haboon inn uu dhakhtar la xidhiidho!

Adiga oo qaba tiibay qasab maaha in aad isku aragtid dhamaan calaamadahan. Dadka qaar ayaa isku arka calaamado qafiif ah.

## Maxaad samaynaysaa haddii aad ka shakidid in aad tiibay qabtid?

Hadii aad ka shakidid in aad tiibay qabtid, waxa wacan inaad u tagtid dhakhtarka joogtada ah, dhakhtarka kediska ah ama adeegyada caafimaad ee degmada aad degan tahay sida ugu dhakhsaha badan.

Baadhitaano kala duwan ayaa la sameyn karaa si loo ogaado in qofku tiibay qabo. Waxa caadi ah in raajo laga qaado sambabada, tijaabo laga qaado jidhka (oo loo yaqaan tijaabada Mantoux) iyo/ama tijaabo dhiig. Hadii ay soo baxdo in aad qaaday bakteriyada tiibayda, waxa lagu dirayaa dhakhtar takhasus oo jooga hosbitaal.